

## Shaqaalaha

Sharciga Shaqaaleedka Ammaanka iyo Caafimaadka Minnesota (Minnesota Occupational Safety and Health Act) wuxuu shardi ka dhigayaa in aad shaqaalahaaga u diyaarisid goob shaqo oo ka badqabta halisyada la yaqaan oo sababi kara dhimasho, dhaawac ama jirro. Sidoo kale waa in aad raacdaa xuquuqda iyo masuuliyadaha goobta shaqada.

- Waa in aad raacdaa heerarka iyo nidaamyada badbadada idil shaqaalaha ee Minneota OSHA (MNOSHA).
- Loo shaqeeyahaaga waa in uu ku siiyo macluumaad kasta oo ku saabsan halisyada kiimikada, halisyada cawaamilka muuqata iyo cawaamilka caabuuqyada goobta shaqada ka dhalan kara.
- Xaq waxaad u leedahay in aad kala hadashid loo-shaqeeyahaaga ama MNOSHA walaacyada ku saabsan ammaanka iyo caafimadka goobta shaqada.
- Xaq waxaad u leedahay in aad diiddo qabashada shaqada haddii aad rumaysantahay in xilka ama qalabka uu kuu keeni karo halis deg-degga ama dhimasho ama dhaawac jirka. Si kastaba, waa in aad qabataa xil kasta oo loo-shaqeeyahaagu kuu xilsaaro. Goobta shaqada si fudud ugama tagi kartid.
- Xaq waxaad u leedahay in lagu soo wargaliyo ama lagu faahfaahiyo haddii loo-shaqeeyahaagu dalbado in wax laga baddelo heerarka shuruudaha MNOSHA.
- Xaq waxaad u leedahay in aad la hadashid baaraha MNOSHA ee goobtaada shaqada baaraya.
- Xaq waxaad u leedahay in aad ka xarayso cabasho MNOSHA ku saabsan ammaanka, caafimaadka halisyada iyo codsato in baaris la sameeyo. MNOSHA uma kashifayso magacaada loo-shaqeeyaha.
- Xaq waxaad u leedahay in lagu tuso xogta dacwdaha idil, ciqaabaha iyo khafiifinta canshuuraha MNOSHA ay ka samaysay loo-shaqeeyahaaga.
- Loo-shaqeeyahaagu kuguma takoori karo isticmaalka xuquuqdaada Sharciga awgeed. Si kastaba, loo shaqeeyahaaga waxuu kugu anshax-marin karaa sababa la xariira in aadan raacin nidaamyada ammaanka iyo caafimaadka. Haddii aad rumaysantahay in loo-shaqeeyahaagu ku takooray sababa la xariira isticmaalka xuquuqdaada Sharciga, waxaa aad haysataa 30 maalmood in aad uga soo dacwooto MNOSHA. Loo-shaqeeyahaagu waa in uu bixiyaa kashifaad kasta iyo xog kasta oo caafimaad ee adiga lagaa hayo marka la weydiisto. Loo-shaqeeyahaagu waa in uu ku siiyaa kashifaad kasta iyo xog kasta ee caafimaad ee adiga kugu saabsan marka ad weydiisato.
- Xaq waxaad u leedahay in aad ka qaybgasho horumarinta heerarka MNOSHA.

## Loo-shaqeeyeyaalka

Waa in ad u diyaarisaa shaqaalahaaga jawi ammana oo caafimaad qaba xorna ka ah halis la garan karo oo sababi karta dhimasho, dhaawac ama jirro iyo u hoggaansanaatid heerarka MNOSHA ee la dabbaqi karo oo idil. Waxaa kale leedahay xuquuqda iyo masuuliyadaha soo socda.

- Waa in aad ku dhajisaa nuqul ka mida sawirkan wayn iyo dokumentiyada kale ee MNOSHA meelaha lagu dhajiyo ogaysiisyada shaqaalaha.
- Waa in aad soo wargalisaa MNOSHA siddeed sacadood gudahood shilalka idil ee sababa dhimasho shaqalaha.
- Waa in aad soo wargalisaa MNOSHA 24 saac gudahood shilalka idil ee sababa addin go', indha-beel ama isbitaal seexin ee shaqaale kasta ku yimaada.
- Waa in aad u oggolaataa baarayaasha MNOSHA in ay sameeyaan baarisyo, waraysiyada shaqaalaha iyo dib-u-eegidda xogta.
- Waa in aad diyaarisaa qalabka idil ee ilaalinta shaqaalaha iyo tababarrada oo aad adigu kharashkooda qabto.
- Xaq waxaad u leedahay in aad ka qaybqaadato horumarinta heerarka MNOSHA.

## Kaalmada ammaanka iyo caafimaadka lacag-la'aanta

Kaalma lacag-la'aana oo la sugayo iyo halisyada saxda ah ayaa shaqaalaha u diyaara, iyado aan dacwao lahayn iyo ciqaab toona, oo loo sii marayo MNOSHA Workplace Safety Consultation telefoonka (651) 284-5060, 1-800-657-3776 ama [osha.consultation@state.mn.us](mailto:osha.consultation@state.mn.us).

*La xariir MNOSHA wixii ku saabsan nuqul Sharciga, ee si gaara u quseeya ammaanka iyo caafimaadka heerarka xaraynta dacwo la xariirta halisyada goobta shaqada.*

Department of Labor and Industry  
Occupational Safety and Health Division  
443 Lafayette Road N.  
St. Paul, MN 55155-4307



(651) 284-5050  
1-877-470-6742  
[osha.compliance@state.mn.us](mailto:osha.compliance@state.mn.us)  
[www.dli.mn.gov](http://www.dli.mn.gov)